OHIO BMV
BUREAU OF MOTOR VEHICLES

Dadka Ohio ku Cusub

HAGAHA

helitaanka Liisanka [ruqsadda]
Dirawalka, Lahaanshaha Baabuurka iyo
Taaragada Baabuurka.

Dadka Ohio ku Cusub

Ku Soo-dhawow Ohio! Waxaa laguu qaddarinayaa deggane Ohio marka aad: shaqo hesho, saxeexdo heshiis kiro, iibsato guri ama ilmahaaga qorto dugsi. **30 maalmood gudahood markaad degto**, waxaad u baahan doontaa liisanka dirawalka ee Ohio naftaada, iyo lahaanshaha Ohio iyo taargada baabuurkaaga. Wixii macluumaad faahfaahsan, fadlan booqo Oho Bureau of Motor Vehicles onlayn ahaan bmv.ohio.gov.

Waxaad u baaha doontaa inaad soo qaadato:

- Lahaanshaha asalka ee baabuurkaaga ama caddayn lahaansho

  Fadlan ogsonow: *Haddii baabuurkaadu leeyahay laba milkiile iyo mid aanu joogin, waxaad u baahan doonta laba awoodaha saxiixa qareenka oo (mid ka mid ah yahay shahaadada (title) iyo mid ka kalena yahay diiwaangelinta). Awoodda qareenimada ee shahaadada waxaa loo baahan yahay inay leedahay nootaayo. Ujeedooyinka diiwaangelinta, waxaad u isticmaali kartaa foomka awoodda qareenka oo nootaayahu saxiixay, ama Ogolaashaha Diiwaanka (foomka BMV 5736) kaas oo aan u baahnayn nootayo oona laga heli karo bmv.ohio.gov.*

- Heshiiska daynta baabuurkaaga (haddii ay jirto)
- Liisanka dirawalka gobolka ka baxsan ee aad haysato.
- Caddaynta magacaaga sharciga ah ee buuxa*
- Caddaynta lambarkaaga Sooshiyal Sekuyuuratiga
- Caddaynta degganaanshaha Ohio (sida bayaan baank, biilka tamarta "koronto/biyo" ama jeeg mushahar intiisa danbe oo leh cinwaan Ohio)
- Cadaynta muwaadinimada ama joogitaanka sharciga ah (tusaale, shahaadada dhalashada, baasaboorka Maraykanka, ama fiiri liiska dukumiintiyada kale ee la aqbali karo)
- Haddii aad ka yar tahay 18 sanno jir, caddayn waxbarasho dirawalnimo iyo qof kula saxeexa (waalid ama wakiil sharci ah)

*Haddii magacaaga buuxa ee sharciga ah oo ka duwan yahay dhokomentiyada aad keentay, waa inaad keento dhokomentiyo dheeraad ah si aad u samaysato magac buuxa oo sharci ah. dhokomentiyada soo-socda ayaa la aqbalaa:

- Shahaadadda ama liisanka guurka
- Nuqul la-ictiraafay ee shahaadadda furitaanka, baabiinta ama burista guurka.
- Nuqul la-ictiraafay ee beddelis magac oo maxkamad amartay.

Fadlan booqo bmv.ohio.gov wixii macluumaad dheeraad ah ee laxiriira dhokomentiyada aqoonsiga.

Hel Liisanka Dirawalka Ohio

Xeeraka Gaadiidka Motoorada leh ee Ohio ayaa kaa caawin doona barashada sharciyada Ohio. Waxaad ka heli kartaa nuqul:

- Wakaalad kasta oo ah sajilaadda liisanada
- Onlayn ahaan bmv.ohio.gov

Si aad ugu bedesho liisankaaga aan gobolka ahayn liisanka dirawalka Ohio, waa inaad booqato wakiilka wakalaadda sajilaadda liisanka.

Waxaad u baahan doontaa inaad soo qaadato:

- Magaca sharciga oo buuxa
- Taariikhda dhalashada
- Sharciga aad Maraykanka kujoogto (tusaale, shahaadada dhalashada, baasaboorka Maraykanka, ama fiiri liiska dukumiintiyada kale ee la aqbali karo)
- Lambarka Social Securitiga
- Ciiwaanka wadada ee Ohio

Ma kayar tahay 18 sano jir?

Kahor intaanad Ohio liisanka ka qaadan, waa inaad:

- Keento caddayn waayo-aragnimo dirawalnimo lix bilood ah (ugu yaraan 50 saacadood oo dirawalnimo, oo ku jirto 10 saacadood habeenkii)
- Keento caddayn dhammaystir cashar waxbarasho dirawalnimo oo waafaqsan rabitaanada waxbarashada dirawalka Ohio
- Haysato qofka kula saxeexa (waalid ama wakiil sharci ah)

Si aad u eegto haddii casharkaaga waxbarashada dirawalka ay uqalanto Ohio, booqo saldhig kasta ee imtixaanada dirawalka adiga oo wata liisankaaga hadda iyo shahaadada dhammaysashada tababarka. Haddii aad buuxiso rabitaanada Ohio, waxaad bilaabi kartaa imtixaanka.

Kaddib dhammaystirka si guul leh imtixaamista, tag Wakaalad kasta oo ah sajilaadda liisanada adiga oo wata:

- Liisankaaga**dirawalka** saxda ah ee gobolka ka baxsan
- Caddayn degganaanshaha Ohio
- Cadaynta muwaadinimada ama joogitaanka sharciga ah (tusaale, shahaadada dhalashada, baasaboorka Maraykanka, ama fiiri liiska dukumiintiyada kale ee la aqbali karo)

Liisanka Dirawal Markii Ugu Horraysay ama Mid Dhacay

Waxa lagaaga baahan doonaa inaad ka gudubto baarista indhaha iyo imtixaanka aqoonta dirawalka ee saldhigga imtixaanka kahor intaanad iibsan *Kaarka Aqoonsiga ee Wadista Ku Meelgaarka ah* (TIPIC).

Waxa lagaaga baahan yahay caddayntaada:

- Magac buuxa oo sharci ah
- Taariikhda Dhalashada
- Muwaadinimada ama joogitaanka sharci (tusaale, shahaadada dhalashada, baasaboorka Maraykanka, ama fiiri liiska dukumiintiyada kale ee la aqbali karo)
- Lambarka Sooshiyal Sekuyuuratiga
- Cinwaanka jidka xaafadda

Fadlan booqo bmv.ohio.gov wixii macluumaad dheeraad ah.

Sida Loo Samaysto Lahaansho Baabuur

Kahor intaanad sajilin baabuurkaaga ee helin taargada baabuurka Ohio, waxaad u baahan tahay inaad ku soo wareejiso lahaanshaha gobolka ka baxsan lahaanshaha Ohio.

***Fadlan ogow**:haddii baabuurkaaga ay ku qoran yihiin laba qof oo wada leh oo mid joogin, waxaad kale oo aad u baahan doonta laba awood siin saxeexan (mid lahaanshaha ah iyo mid sajilaadda ah).*

- Lambarka Sooshiyal Sekuyuuratiga waxa looga baahan yahay cid walba dhammaan.
- Sawirka nuqulada lahaanshaha lama oggola.
- Haddii dayn lagu leeyahay lahaanshahaaga, waa inaad marka hore soo buuxisaa codsi soo-wareejin (laga helo Karaaniga Degmada ee Xafiiska Lahaanshaha Maxkamadaha) oo aad u dirto cidda daynta kugu leh.
- Wakiilada kirada iyo lahaanshaha gobolka ka baxsan, lambarka ruqsadda kirada iyo lambarka xisaabta cashuuraha Ohio (99-XXXXXX) ayaa la rabaa.

Kahor dhammaystirka wareejinta lahaanshaha, waa inaad soo xaqiijisaa tirada saxda ah ee saacadda socodka baabuurka iyo dhammaan macluumaadka shahaadadda lahaanshaha.

Maxaan U Baahnahaya inaan U Soo-qaato Xafiiska Lahaanshaha?

- Shahaadadda lahaanshaha gobolka ka baxsan
- Dhokomentiyo aqoonsi la aqbali karo iyo bixinta ujrada lahaanshaha (fadlan kala xiriir Karaaniga Degmada ee Xafiiska Lahaanshaha Maxkamadaha wixii faahfaahin ah)
- Foomka kormeerista lambarka aqoonsiga baabuurka (VIN) ee gobolka ka baxsan, baaritaanka waxa samayn kara wakaaladaha sajilaadda liisanka iyo iibiyayaasha baabuurta oo badan (ujro ayaa jirta)
- Fasaxidda daynta ee cidda amaahda kugu leh, laba nuqul asal ah ee awood siinta dayn-bixiyaha (haddii anaad haysan waraaq muujinaysa fasaxidda daynta oo uu saxeexay cidda daynta kugu leh)
- Hawlaha kiro-iibka oo keliya, laba nuqul asal ee awood siinta oo ka socota cidda daynta kugu leh (mid si loo helo lahaanshaha Ohio iyo mid si loo helo sajilaadda baabuurka iyo liisanka taargada)
- Bayaanka saacadda socodka [odometer]
- Codsi(yo) ee Shahaadadda Lahaanshaha Baabuur (Foom BMV 3774).

Sida loo Sajilo Baabuurkaaga

Si baabuurkaaga Ohio aad uga sajisho, tag wakaalad kasta oo ah sajilaadda liisanada oo u dhiib:

- Shahaadadda Lahaanshaha Ohio ama Caddayn Lahaansho
- Liisanka Dirawalka Ohio, aqoonsi gobol or Lambarka Sooshiyal Sekuyuuratiga
- Lambarka aqoonsiga cashuurta (haddii lahaanshaha baabuurka uu ku qoran yahay magaca mehradda ganasiga)
- Heshiis kiro iyo dhokomentiyada awood siinta (haddii ay jiraan)
- Shahaadad E-Check ah (degmooyinka ay saamaysay: Cuyahoga, Geauga, Lake, Lorain, Medina, Portage, Summit; wac 1-800-CAR-TEST wixii macluumaad dheeraad ah)

Fadlan ogow: *haddii baabuurkaaga ay ku qoran yihiin laba qof oo wada leh oo mid aanu joogin, waa inaad keento foomka awood siin saxeexan oo nootaayo leh ama Amar-siinta Sajilaadda (Form BMV 5736) adiga.*

Fadlan booqo bmv.ohio.gov wixii macluumaad dheeraad ah, oo ay ku jiraan ujro.

Waafaqsan Sharciyada Baabuurta Ohio

Suunka Badbaadada

Dirawaliinta iyo kuwa fadhiya kuraasta hore ee baauurta badidooda waa inay xirtaan suunka badbaadada. Dirawaliinta kayar 18 sano jir, dhammaan dadka saaraan baabuurka waa inay xirtaan suunka badbaadada.

Ka-reeban:

- Carruurta ku sheegan xeerka xannibaadda ee ilmaha
- Dadka wata baabuurta guryaha gaysa boostada iyo wargaysyada
- Dadka ka wata shahaado dhakhtarkooda sharxaya xaalad caafimaad oo u diidaysa xidhashada suunka badbaadada
- Dadka ku jira baabuur la sameeyey kahor 1966

Carruurta ku sheegan xeerka xannibaadda ee ilmaha

Ilmo kasta oo kayar afar sano jir ama miisaanka kayar 40 rodol waxa looga baahan yahay inuu isticmaalo suunka ilmaha loogu talogalay oo waafaqsan heerarka baabuurta ee federaalka goorta ay saaran yihiin baabuur.

Carruurta da'da 4 - 8 waa in si habboon loogu xakameeyaa kursi goorta ay saaran yihiin baabuur

Carruurta da'da 8 - 15 waa in si habboon loogu xakameeyaa suunka badbaadada goorta ay saaran yihiin baabuur

Liisanka Dirawalka

Liisanka dirawalka wuxu sharci yahay afar sano oo wuxu dhacayaa taariikhda dhalashadaada.

Ma jirto waqti la isku dhaafaa. Liisanka dirawalka ganacsiga waxa looga baahan yahay dirawalada baabuurta ganacsiga.

Sharciga Xilka Maaliyadeed

Qofna baabuur ma kaxayn karo bilaa caddayn caymis. Caymis damaanad $25,000 - $ 50, 000 oo dhawaca qofka ama dhimasho iyo $25,000 dhaawaca hantida ah ayaa loo baahan yahay.

Haddii uu kugu dhaco shil keena dhaawan ama ka badan $400 oo waxyeello ah iyo qolada kale oo aan caymisnayn, waxaad buuxin kartaa Warbixin Shil (foomka BMV 3303) si looga xannibo dirawalnimada qofka kale.

Dadka aan ahayn degganayaal

Qofka aan ahayn deggane wuu wadan karaa baabuur sajilaad Ohio la'aanteed maadaama uu gobolkiisii ama dalkiisii ka sito caddaymo xuquuqdaas leh. Dadka aan ahayn degganayaal milatari ah waxay isticmaali karaan liisanka dirawalka ee gobolkooda. Xubnaha qoysku waa inay qaataan liisanka sirawalka ee Ohio.

Cabbitaanka Alkolada

Weelka furan ee cabbitaan alkolo waa mamnuuc.

Inta Alkolo Kujirta Dhiigga (BAC)

Dhammaan dirawaliinta lagu oogo dirawalnimo iyaga oo cabsan daroogo ama alkolo haddii alokolada dhiigga kujirta (BAC) ay tahay .08 boqolkiiba ama ka badan.

Dirawalada kayar 21 sano jir ee alkolada dhiigga kujirtaa ay tahay boqolkiiba .02 ama ka badan, laakiin kayar boqolkiiba .08, waxay mutaysan karaan ciqaab lagu soo oogo oo la dhaho Wadista Baabuur Kaddib Qaadashada Alkolo Da' yar Ahaan (OVUAC).

Dirawaliinta ganacsiga waxa lagu oogi kala alkolada dhiigga kujirta BAC oo ah boqolkiiba .04 ama ka badan.

Liisanka Taargada

Taargooyinka baabuurka ee hore iyo dambe ayaa looga baahan yahay dhammaan baabuurta, taraagyada iyo baabuurta guurta haddii gaariga aan loo diiwaangelin sida baabuur taariikhiga ah.

Taayirada Biraha leh

Taayirada biraha leh waxa la oggol yahay laga bilaabo Noofambar 1 illaa Abril 15.

Hadhaynta Dariishadda

Dariishada hore iyo danbe, hadhaynta waa in lnuurka aga arkaa boqolkiiba 70. Dariishadaha dhinacyada, hadhaynta waa in bolkiiba 50 la arki karaa, loo geeyey ama lagu jaray boqolkiiba 3.

Xeerka Xumuulka Furan

Ilmaha kayar tahay 16 sano jir ee saaran baabuur xumuul xaggiisa danbe ama tareelle ku socda 25 mayl saacaddii lama oggola.

Dhugdhuglay

Wadida dhugdhuglay ayadoon qofka aanu u haysan liisan, oggolaansho, ama ruqsad kumeelgaar ah waa mamnuuc sharciga. Dhugdhuglay daboolan uma baahna oggolaansho.

Koofiyadda badbaadada ayaa looga baahan yahay raacayaasha kayar da'da 18 iyo kuwa aan haysan liisanka dhugdhuglayda ama oggolaansho kayar hal sanno. Koofiyadda badbaadada loogama baahna dhugdhuglayda daboolan. Muraayadda/okiyaalaha badbaadada ama muraaydda dabaysha ayaa loo baahan yahay.

Sameecadda-dhagaha

Isticmaalka Sameecadda-dhagaha marka la wado baabuur waa mamnuuc, marka laga reebo wadayaasha dhugdhuglayee u isticmaalay ujeedooyin wada-xiriirtan.

Liisanka Baaskiiladda Motoorka leh

Liisanka baaskiiladda motoorka leh waxa la siin karaa qof kasta oo 14 sano jir iyo kaweyn oo ka gudba imtixaanada aragtida, qoraalka iyo xirfadda.

Raadaar

Sharciga Gobolka uma baahna in sharcifulinta raadaarka la soo dhejiyo. Marka laga reebo baabuurta ganacsiga, soo-qabtayaasha raadaarka waa sharci laakiin laguguma talinayo.

Xero ku nasashada

Xero ka samaysashada meelaha lagu nasto waa mamnuuc

Meelaha Baarkinka ee dadka Naafada

Dadka qaba naafanimo waxay heli karaan taargada liisanada ama boodhka dariishadda si ay u dhigtaan baabuurta meelaha baarkinka ee dadka naafada ay dhigtaan.

OHIO DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY

SAFETY • SERVICE • PROTECTION